



Orientation to Ontario

ILAALINTA AQOONSIGAAGA

Xatooyada aqoonsiga waa marka qof uu u adeegsado aqoonsigaaga dano dhaqaale. Wuxuu lacag ka xadi karaa koontadaada bangiga ama wuxuu kaarka daynta ama adeegga moobilak ku samaysan karaa magacaaga. Difaac xogtaada gaarka ah iyo dukumiintiyada si aad u difaacdo naftaada.

- Waa inaad difaacdaa Lambarkaaga Caymiska Bulshada (SIN). Ku kaydso dukumiintiyada uu ku qoran yahay SIN kaagu meel amaan ah.
- Waa inaad keliya u sheegtaa SIN kaaga qof aad u shaqayso, wakaaladaha dawlada iyo xarumaha dhaqaalaha.
- Meel amaan ah dhigo dukumiintiyada kale ee muhiimka ah sida baasaboorada iyo dukumiintiga socdaalka.
- Fiiri baaqiga bangigaaga iyo kaarka daynta si joogto ah si aad u eegto in falal tuugnimo ah lagu sameeyay.
- Haddii aad lumiso waladkaaga, xir kaararkaaga daynta soona sheeg luminta aqoonsigaaga isla markaba.

La xariir Service Ontario haddii uu kaa lumo Kaarkaaga Ruqsada Darawalka ama Kaarka Caafimaadku.

- La xariir Service Canada haddii aad isleedahay in lambarkaaga caymiska bulshada la xaday.

Amaanka Oonleenka

Amaanka oonleenu waa sida aad u difaacayso xogtaada iyo aqoonsigaaga oonlaynka. Amaanka oonleenu waxaa sidoo kale ku jira ilaalinta kumbuyuutarkaaga iyo aaladaha kale.

- Ku xiro baasweero xoog badan kumbuyuutarkaaga, taleefanka iyo taableedka.
- Ku shubo softweerka kahortaga fayraska kumbuyuutarkaaga.
- Hala wadaagin baasweerkaaga ama Lambarkaaga Xogta Gaarka ah (PIN) qof kale.
- Mar kasta ka bax webseedyada marka aad isticmaalayso kumbuyuutarada dadwaynaha.
- Ha gujin lifaaqyada ama waraaqaha lagusoo diro iimeelka ee ka yimaada direyaal aadan aqoon.
- Hubi sitinnada sirta ee ciwaanadaada baraha bulshada cid kalena ha u sheegin xogta gaarka ah.

Iska ilaali Khiyaanooyinka

Waa sharci daro in shirkadaha iibiya kulayliyaha, agabka qaboojinta iyo biyaha ama adeegyada kale ay adeegyada ku iibshaan albaab kasta. Tusaaleyaasha shirkadahaan waxaa kamid ah adeegyada foornooyinka, biyo kuleyliyaasha, hawo sifeeyaasha iyo boor sifaynta. Haddii aad saxiixdo heshiiska wax kamid ah adeegyadaan ama agabkaan, waa sharci daro.

Danbileeyaasha qaar ahaa dadka taleefanka ka khiyaani kara ayagoo iska dhigaaya inay ka socdaan Wakaalada Dakhliga ee Canada (CRA) ama booliiska. Midkoodna saraakiisha CRA walaal booliiska ayaan ku soo wici doonin si ay kaaga dalbadaan lacag ama kuugu hanjabaan. Haddii aad hesho wicitaan ku waydiinaaya inaad soo dirto

Funded by / Financé par



lacag ama xogta gaarka ah, waydii wacaha xog dheeraad ah ama ka codso inuu kuugu dhiibo kormeerihiisa. Haddii wucuhu diido, jar wicitaanka. Haddii wicitaannada noocaas ah kusoo gaaraan, u sheeg booliiska.

ILAHA XOGTA

Ontario Ministry of Government and Consumer Services
www.ontario.ca

Better Business Bureau (BBB)
www.bbb.org/en/ca

Canadian Anti-Fraud Centre
1-888-495-8501

U dir iimeellada aadan doonayn ama aad ka shakido spam@fightspam.gc.ca

Xog badan oo ku saabsan tuugada aqoonsiga ka ogoow webseedka Dawlada Ontario: ontario.ca

U sheeg dhacdooyinka amaanka oonleenka ama xatooyada aqoonsiga waaxda booliiska ee deegaankaaga.

